SOMALI DIALOGUE PLATFORM

Somali Public Agenda

Maajo 2023

# Doorka uu 4.5 ku leeyahay dimuqraadiyeynta iyo dowladnimada Soomaaliya

Saameyntiisa iyo talooyin tixgelin mudan

**Faallo Kooban:** SDP.03

# Dulmar

Inkastoo ay isbeddello waaweyn ka dheceen saaxadda siyaasadda Soomaaliya labaatankii sano ee lasoo dhaafay, arrin aan is beddelin ayaa ah ku tiirsanaanta nidaamka awood-qeybsiga beelaha, oo ay kamid tahay '4.5'. Inkastoo Dastuurka Kumeelgaarka ee Soomaaliya uusan dhigeyn wax tixraac ah oo la xiriira nidaamkan, haddana waxa uu hannaanka 4.5 go'aamiyaa saami qeybsiga beelaha ee Golaha Shacabka iyo Golaha Wasiirrada. Nidaam awood-qeybsi beeleed ayaa ka jira Aqalka Sare, xilalka muhiimka ah ee hoggaanka dalka, qeybsiga awoodaha siyaasadeed ee dowlad-goboleedyada, iyo heerka dowladaha hoose.

Nidaamka 4.5 ayaa markii ugu horeysay la hindisay sanadkii 1997 si uu u noqdo nidaam kumeelgaar ah oo lagu maareeyo metelaadda siyaasadda dagaaladii sokeeye ee Soomaaliya ka dhacay kadib, iyadoo saami qeybsi isla-eg loo qoondeeyay afar beelood halka bar loo qoondeeyay dhowr beelood oo la isku geeyay. Nidaamkan waxaa la rasmiyeeyay sanadkii 2000, Shirkii Nabadda ee Carta, Jabuuti. Nidaamka waxaa ugu horeyntii ku heshiiyey saamileyda siyaasadda si uu u noqdo hab looga gudbo dowlad la'aanta ilaa inta dastuur cusub uu nidaaminayo hababka metelaadda baarlamaanka ee dalka. Aragti ahaan, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012 ayaa meel looga gudbi karo gaarsiiyey habkan kumeelgaarka ah, maadaama qodobka 4-aad uu damaanad qaadayo ka-qeybgalka dadka oo dhan ee doorashooyinka, iyadoo lagu saleynayo nidaamka xisbiyada siyaasadeed. In ka badan toban sano kadib markii la ansixiyay dastuurka, wax horumar ah lagama gaarin in laga gudbo nidaamkii kumeelgaarka ahaa ee 4.5. Ma jirin afti dadweyne ama doorasho toos ah oo la qabtay, iyadoo metelaadda Golaha Shacabka ay weli ku saleysan tahay 4.5. Waxaa intaa dheer, awood qeybsiga beelaha ayaa ah mid si baahsan loogu dhaqmo.


Doorka isticmaalka joogtada ah ee 4.5 ayaa muran weyn ka dhex dhaliyay madaxda siyaasadda Soomaalida iyo guud ahaan shacabka, iyadoo dad badan ay ku doodayaan in yegleelidda maamul dimoqraadi ah ay suurageli karto keliya haddii la joojiyo habka awood qeybsiga beelaha. Dadaalladii lagu doonayay in looga gudbo nidaamkan ayaa sanadihii u dambeeyay lagu guul-darreystay, maadaama saamiley kala duwan ay leeyihiin aragtiyo iyo dano iskasoo horjeeda oo ku saabsan goorta, sida iyo heerka arrintan laga gudbi karo.

Heshiis la'aantan, oo ay weheliso ku-tiirsanaanta baahsan ee awood-qeybsiga beelaha, ayaa caqabad weyn ku ah horumarka siyaasadeed ee Soomaaliya, gaar ahaan marka la eego xoojinta dimuqraadiyeynta iyo suuragelinta maamul tayo leh oo dadka u shaqeeya lagu xusho karti iyo aqoon. Waxaa lama huraan ah in wada-hadal loo dhan yahay oo macno leh la sameeyo kaasoo diiradda lagu saarayo heshiis-ka-gaaridda arrintan. Sidaas darteed, faalladan qotada-dheer ujeedadeedu waxay tahay in aragti lagu biiriyo lana xoojiyo doodaha la xiriira nidaamka 4.5, iyo sidoo kale guud ahaan habka awood qeybsiga beelaha. Qormadan waxa ay soo koobaysaa cilmibaaris ballaaran ee uu Platform-ka ka sameeyay mowduucan, oo ay ku jiraan wareysiyo lala yeeshay khubaro Soomaaliyeed oo xog-ogaal ah; dib-u-eegis lagu sameeyay qoraallada horey looga qoray mowduuca iyo dukumintiyo siyaasadeed; iyo falanqeyn ku aadan qaabka heer qaran looga hirgeliyey nidaamka 4.5. Warbixinta waxa ay dulmar guud ku sameyneysaa taariikhda awood-qeybsiga beelaha ee Soomaaliya, kahor inta aan la faafaahin sida nidaamka 4.5 loogu dhaqmayey kahor shirkii Carta. Intaas kadib, waxa ay warbixintu falanqeyneysaa saameynta uu 4.5 ku leeyahay heshiiska siyaasadeed ee Soomaaliya iyo geeddi-socodka dimuqraadiyeynta, iyadoo gabagabada lasoo bandhigayo dhowr xulasho oo tixgelin mudan.

# Taariikh kooban ee awood-qeybsiga beelaha ku saleysan ee Soomaaliya

Inkastoo ay jiraan tusaalayaal la diiwaangeliyay oo ku saabsan awood-qeybsiga beelaha ee Soomaaliya xilligii gumeysiga kahor, guud ahaan baahi badan looma qabin in awoodaha beelo lagu qeybsado marka laga reebo dhowr maamul oo xeebaha ku teedsanaa, sababtoo ah khilaafyada beelaha inta badan waxaa lagu xalin jiray nidaamka xeer dhaqanka. Imaatinkii gumeystayaashii Yurub, oo billaabay qaab-dhismeedyo dowladeed oo rasmi ah ayaa beddelay xaaladdii dalka. Xornimadii kadib 1960-kii, waxaa la dhisay 123-dii kursi ee ugu horreeyay ee 'Golaha Qaranka', oo ay metelaaddu ku saleysneyd doorashooyin xisbiyo badan. Inkastoo aysan wakhtigaas jirin nidaam awood-qeybsi oo qabiil ku saleysan, haddana beelaha qaar ayaa walaac ka muujiyey in aanay helin xilal siyaasadda (eeg Jaantuska 1-aad).1


**Jaantuska 1-aad. Dowladdii rayidka ee xornimada kadib oo lagu eegay saamiga 4.5, 1960—1969[1]**




Markii uu xukunka qabsaday taliskii Siyaad Barre 1969-kii, waxa uu sameeyay isku dayo uu ku baabi'inayo waxa uu ku tilmaamay 'qabyaalad'. Dhab ahaantii, dowladdu waxay isticmaaleysay qabiilka, taasoo keentay in dhowr beelood laga saaro dowladda (eeg Jaantuska 2-aad). Ugu dambeyntii, taliska militariga waxa uu xoojiyay doorka aqoonsiga qabiilka ku leeyahay siyaasadda, isagoo adeegsanaya hay'adaha dowladda si uu awoodda ugu xoojiyo isbahaysiga beeleed ee Barre iyo in ciqaab wadareed lagu sameeyo beelaha loo arko in ay kasoo horjeedaan awoodda madaxweynaha.

1 Tirakoobkan waxaa lagasoo xigtay Abdiwahid Haji Osman et al., *Clan, Sub-clan, and Regional Representation in the Somali Government Organization, 1960–1990*, 1990. Xubno katirsan beelaha 0.5 qeyb kama aanay ahayn xukuumadihii dalka ee xilligii dowladdii rayidka.

**Jaantuska 2-aad. Golaha wasiirrada dowladdii kacaanka oo lagu eegay saamiga 4.5, 1969—1990**




Kadib Burburkii dowladdii dhexe sanadkii 1991, waxaa la sameeyay isku dayo isdaba joog ah oo dib loogusoo celinayo dowlad rayid ah. Arrintan ayaa xoogga lagu saarayey sida lagu gaari karo metelaad siyaasadeed iyadoo lagu jiro xaalad dagaal sokeeye. Shirkii Sodere ee ka dhacay Itoobiya dabayaaqadii 1996-kii ilaa horraantii 1997-kii waxaa markii ugu horaysay qeybo ka mid ah beelaha, oo ay ku jiraan kooxaha loo aqoonsan doono '0.5', lagusoo daray hannaanka dib-u-heshiisiinta. Shirkan ayaa horseeday in la dhiso Golaha Badbaadada Qaranka oo muddo kooban jiray, kaasoo afar beelood loo qoondeeyay min sagaal kursi, halka shan kursi loo qoondeeyay beelaha 0.5.

Saddex sano kadib, waxaa dib loosoo nooleeyay nidaamka 4.5, waxaana lagu rasmiyeeyay shirweynihii Nabadeynta Soomaaliya ee Carta, dalka Jabuuti, ee dhacay intii u dhexeysay bilihii May iyo Ogosto ee sanadkii 2000. Shirka Carta waxaa diiradda ugu horreysa lagu saaray dhisida baarlamaan cusub oo lagu saleeyay 18-kii gobol ee Soomaaliya ka jiray dagaallada kahor, iyo sidoo kale ku heshiinta metelaadda ka qeybgalka shirka. Habkani waxa uu noqday

mid cakiran sababo la xiriira fasiraado is khilaafsan oo laga bixiyey xuduudaha gobollada maadaama ay dadka gobollo aanay horey u degi jirin u barakeceen intii uu dagaalku socday, iyadoo sidoo kalena degmooyin badan loo arkayey in ay qabsadeen maleeshiyo u dhashay beelo kale. Sidaas darteed, waxaa lasoo jeediyay talo ah in guud ahaan metelaadda lagu saleeyo — ka qeybgalka shirka iyo xubnaha baarlamaanka kumeelgaarka ah ee lagu dhisayo — beelaha. Inkastoo la sheegay in aqoonyahannadii iyo xubnihii bulshada rayidka ahaa ee lagala tashaday ay arrinkan ka cagajiideen, haddana talada waa la qaatay maadaama loo arkay xulashada ugu macquulsan ee lagu maareyn karo rabshadaha iyo barakaca ballaaran ee dalka ka jiray.


Habab kala duwan oo ku saabsan awood-qeybsiga beelaha ayaa laga dooday, iyadoo ugu dambeyn lagu heshiiyey in nidaamka 4.5 lagu saleeyo: in afarta beel ee waaweyn midkiiba uu helo 44 kursi, halka beelaha 0.5-ta ay si wadar ah u helayaan 24 kursi. Dumarku waxay heleen 25 kursi, oo si siman loogu qeybiyey shanta kooxood. Haddaba, afarta beel ee waaweyn waxay heleen wadar ahaan 49 kursi midkiiba halka beelaha 0.5 ay iyagana heleen 29 kursi taasoo ka dhigeysa wadarta guud ee 225 xildhibaan. Tani waxay noqotay billowgii in siyaasadda Soomaaliya si rasmi ah loogu isticmaalo nidaamka 4.5, iyadoo wixii wakhtigaas ka dambeeyay uu nidaamkan sii ahaa mid aan qorneyn balse saldhig u ah metelaadda siyaasadeed ee dalka.

# Isticmaalka nidaamka 4.5 tan iyo Carta

## Hogaanka qaranka/federaalka

Tan iyo markii la hirgeliyey nidaamka 4.5, waxaa caado noqotay in labada jago ee ugu sarreeya dowladda – Madaxweynaha iyo Raysal Wasaaraha –ay isku bedbedelaan beelaha Daarood iyo Hawiye. Mar kasta oo Madaxweynaha loo doorto mid kamid ah labadaas beel, waxa jagada Raysal Wasaaraha noqonayay beesha kale. Sidoo kale, waxaa caado noqotay in afhayeenka Golaha Shacabka uu kasoo jeedo Raxanweyn. Xilalka Raysal Wasaare ku xigeen iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa tan iyo markii la aasaasay waxaa qaadanayay Beesha Dir/Isaaq. Beelaha 0.5 waligood ma aanay qaban jagooyinka ugu sarreeya ee hogaanka qaranka, balse waxaa loo qoondeeyay gudoomiye ku xigeenka koowaad ee Golaha Shacabka.


**Jaantuska 3-aad. Xilalka hoggaanka qaranka/federaalka oo lagu eegay saamiga beelaha, 2000–2022**



## Golaha wasiirada qaranka/federaalka

Ilaa sanadkii 2009, nidaamka 4.5 si adag looguma dabaqin qoondeynta jagooyinka golaha wasiirada – tusaale ahaan, Golihii Wasiirada ee ugu horeeyay ee Raysal Wasaare Galaydh ee sanadkii 2000 ayaa si weyn metelaadda beelaha 0.5 u hareer maray. Tobankii sano ee xigay ee dowladihii kumeelgaarka ahaa, si kastaba ha ahaatee, u hoggaansanaanta nidaamka 4.5 ayaa isisoo tarayay, iyadaoo ay sii kordheysay metelaadda beelaha 0.5. Lagasoo bilaabo Xukuumadii Cumar Cabdirashiid Sharmaarke ee 2009 ilaa iyo Xukuumadii Cabdiweli Maxamed Cali 'Gaas' ee 2011, nidaamka 4.5 waxa loogu dhaqmayay si sax ah. Tan iyo markii la ansixiyay dastuurka kumeelgaarka ah ee 2012, golaha wasiirada ee Dowladda Faderaalka Soomaaliya (DFS) waxay isticmaaleen si u dhow qaab-dhismeedka '5.0', iyadoo inta badan beelaha 0.5 la siinayay metelaad la siman kuwa ay afarta beel ee waaweyn leeyihiin.

**Jaantuska 4-aad. Golaha Wasiirada ee Dowladii Kumeelgaarka ahayd, Dowladii Federaalka Kumeelgaarka, iyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya oo lagu eegay saamiga 4.5, 2000-2022**



## Golaha baarlamaanka qaranka/federalka

Shirkii Carta kadib, nidaamka 4.5 waxa si joogto ah loogu dabaqay dhismaha golayaashii baarlamaan ee kumeelgaarka ahaa. Inkastoo tirada saxda ah ee baarlamaanka – iyo sidoo kale tirada kuraasta loo qoondeeyay beel kasta— ay kala duwan tahay, haddana 275 kursi oo Golaha Shacabka ayaa la isticmaalayey tan iyo sanadkii 2012, iyadoo 54 kursi cusub oo Aqalka Sare ah la dhisay 2016/17-kii (kaasoo aan waafaqsaneyn nidaamka 4.5, balse lagu dabaqay nidaam awood qeybsi beelo).

Lagasoo billaabo sanadkii 2016, dhismihii dowlad-goboleedayada waxa uu keenay in kursi kasta oo baarlamaanka ah loo asteeyo dowlad-goboleed iyo sidoo kale qabiil. Dukuminti kasoo baxay Xafiiska Madaxweynaha Oktoobar 2020-kii oo qeexaya nidaamka hirgelinta heshiiska doorashada Sebteembar 2020 ee u dhexeeyay madaxda dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedayada ayaa noqonaya mid kamid ah dukumintiyada rasmiga ah ee tirada yar ee qeexaya qaabka metelaadda beelaha ee baarlamaanka hadda jira. Iyadoo dukumintigan iyo diiwaannada kale ee rasmiga ah la adeegsanayo, ee uu ku jiro xog-keydiye uu sameeyay Xafiiska Raysal Wasaaraha oo lagu daabacay kuraasta HoP ee lagu tartamay, waxaa noo suurtagaleysa in aan kasoo saarno qaabka qoondeynta kuraasta ee beelaha (eeg Tusmada 1-aad).


**Tusmada 1-aad. Beelaha uu ka koobanyahay Golaha Shacabka, 2022**

| 0.5 | | Darod | | Dir | | Hawiye | | Rahanwein-Digil | | Rahanwein-Mirifle | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Kulmis | 11 | Marehan | 14 | Isaaq | 28 | Haber Gedir | 12 | Dabare | 3 | Hadamo | 4 |
| Bantu | 7 | Absame/ Ogaden | 12 | Gadabursi | 9 | Abgal | 9 | Garre | 3 | Boqol Hore | 3 |
| 'Caste' | 7 | Majerten | 12 | Isse | 8 | Hawadle | 8 | Jido | 3 | Elay | 3 |
| Benadiri | 6 | Dhulbahante | 8 | Biyomal | 5 | Murusade | 7 | Shanta Alemod | 3 | Harin | 3 |
| | | Lelkase | 5 | Surre | 3 | Gaaljecel | 5 | Tuni | 3 | Leysan | 3 |
| | | Warsangeli | 5 | Gadsan | 2 | Duduble | 4 | Bagadi | 2 | Luway | 3 |
| | | Awrtable | 3 | Bajamal | 1 | Badi'ade | 3 | Geledi | 2 | Ashraf | 2 |
| | | Dishishe | 2 | Fiqi Mohamud | 1 | Sheikhal | 3 | | | Gelidle | 2 |
| | | | | Madalug | 1 | Udejeen | 3 | | | Hubeer | 2 |
| | | | | Qubays | 1 | Hilibi | 1 | | | Jilible | 2 |
| | | | | Wardey | 1 | Jidle | 1 | | | Jiroon | 2 |
| | | | | Gurgure | 1 | Jijeele | 1 | | | Ma'alin Weyne | 2 |
| | | | | | | Moblen | 1 | | | Yantar | 2 |
| | | | | | | Silcis | 1 | | | Eylo | 1 |
| | | | | | | Wadalan | 1 | | | Gabaweyn | 1 |
| | | | | | | Wacdan | 1 | | | Garwale | 1 |
| | | | | | | | | | | Gasargude | 1 |
| | | | | | | | | | | Geledi | 1 |
| | | | | | | | | | | Haraw | 1 |
| | | | | | | | | | | Heledi | 1 |
| | | | | | | | | | | Reer Dumal | 1 |
| | | | | | | | | | | Wanjel | 1 |

## Metelaadda haweenka ee nidaamka 4.5

Ma jiro qodob gaar ah oo muujinaya ka mid noqoshada haweenka ee nidaamka 4.5, iyadoo ay jirto in haween badan ay ka qeyb galeen Shirkii Carta ee 2000 oo markaas loo aqoonsaday beesha 'lixaad'. Dhab ahaantii, isticmaalka nidaamka qabiilka ee ku saleysan abtirsiimada ayaa sababay in dumarka la takooro marka laga hadlayo ka qeybgalka siyaasadda. Cadaadis caalami ah oo ku aaddan hirgelinta qoondada haweenka kadib, kuraas gaar ah – oo weli u badan beelo gaar ah – ayaa loo asteeyay in ay yihiin 'kuraas haween'. Natiijo ahaan (ugu yaraan tan iyo sanadkii 2016 oo la billaabay nidaamka ergada qabiilka), haweenku, marka kuraas kooban laga reebo, waxa ay la tartamayeen haween kale, taasoo ka dhigeysa in dhammaan kuraasta kale ay ku tartamaan rag oo keliya. Sida ay sheegtay Ladan Affi, markii ugu horreysay ee qoondada haweenka ee 30 boqolkiiba la billaabay doorashadii 2012, 'beelaha yaryar waxay saami badan oo kuraas ah u qoondeeyeen haweenka. Taasi ma ahayn mid ku timid in beelaha yar yar ay si weyn uga go'neyd ka qeybgalka haweenka, balse beelihii waaweynaa ayaa ku cadaadiyey in beelaha yar yar ay haween soo xulaan, ama kursiga laga siin doono beel kale (oo kursiga la wadaagta) oo diyaar u ah in ay dumar usoo magacaabaan kursiga, si loo helo qoondada dumarka.'[2] Cagajiidka beelaha siyaasad ahaan iyo ciidan ahaanba xooggan ee metelaadda haweenka ayaa sidoo kale waxa ay ka muuqataa Golaha Wasiirrada. Lagasoo bilaabo sanadkii 2000, 29-ka dumar ee qeybta ka noqday golaha wasiirrada billowga muddo-xileedka raysal wasaaraha, in ka badan kala bar (15) waxaa la siiyay beelaha 0.5.

**Jaantuska 5-aad. Tirada haweenka kamid noqday golaha wasiirada oo lagu eegay saamiga 4.5, 2000—2022**




## Wareegga kursiga

Inkastoo nidaamka 4.5 uu caddeynayo awood qeybsiga u dhexeeya beelaha, saami qeybsiga kuraasta ee beelaha iyo jufooyinka dhexdooda ayaa ahaa mid aan fadhin oo dib-u-gorgortan loo galo. Gorgortankan waxaa loo maraa wadahadal dhex mara odayaasha beelaha, iyo sidoo kale faragelin ay sameeyaan hoggaamiyeyaasha siyaasadda. Inta badan, kursi kasta oo kamid ah 275-ta kursi ee Golaha Shacabka ee hadda jira waxaa si wada jir ah u leh dhowr jufo—badanaa inta u dhexeysa labo ilaa shan jufo—kuwaasoo qaraabo dhow ah. Badankood kuraasta la isla leeyahay ayaa mara nidaam wareegid ah oo ay ku heshiiyaan odayaasha beelaha inkastoo ay yartahay in arrintan qoraal laga helo. Nidaamka noocan oo kale ah ayaa inta badan faa'iido u leh beelaha leh awood ciidan iyo mid dhaqaale. Xeerka wareegidda ayay jufooyinka iyo gobollada ku kala duwan yihiin. Halka xaaladaha qaar in la ilaaliyo xiriirka beelaha ay ku xiran tahay in wareegtadu u dhacdo sida ay ku heshiiyeen hoggaanka beelaha ay khuseyso, qaar kalena waxa dhici karta in go'aanka ay mar mar gaaraan wakiilada jufooyinka tirada badan.

2 Ladan Affi, 'The Old Men Who Hold Us Back': Clan Elders, Elite Bargaining and Exclusionary Politics', *Journal of Somali Studies* 7/2 (2020).

## Isbeddelka doorka odayaashu ku leeyihiin awood-qeybsiga beelaha

Sanadkii 2012, kadib ansixintii Dastuurka Kumeelgaarka ah, 135 oday dhaqameed – oo lagu saleeyay saami qeybsiga 4.5 ayna magacaabeen Guddiga Farsamada Xulista ee geeddi-socodkii kumeelgaarka — ayaa si rasmi ah loogu aqoonsaday in ay yihiin wakiillada dhaqanka beelaha Soomaaliyeed, waxaana loo xilsaaray in ay soo magacaabaan xubnaha 275-ta kursi ee baarlamaanka. Sanadkii 2016, waxaa dib-u-eegis lagu sameeyay liiska 135-ta oday, waxaana loo xilsaaray mar kale in ay kursi kasta oo kamid ah kuraasta Golaha Shacabka usoo magacaabaan 51 ergo oo u codeeya musharixiinta tartameysa. Waxaa jira fasiraado badan oo muujinaya sida habkan loo farageliyey si loo xaqiijiyo natiijooyin ay rabeen musharraxiin gaar ah, iyadoo odayaasha la laaluushay si ay u magacaabaan ergo gaar ah iyo/ama ergo la laaluushay si ay si musharrax gaar ah ugu codeeyaan.

Liiskii 135-ta oday waxaa laga guuray habraacii doorashada 2021/22. Taa beddelkeeda, awood aad u weyn ayaa la siiyay guddiyada fulinta doorashada heer dowlad-goboleed oo ay magacaabeen, inta badanna u adeegayay, rabitaanka madaxweynayaashooda. Qaar badan oo kamid ah madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada ayaa iyaguna waxaa aad u saameeyay dowladda federalaka. Markan, 'guddiyada xulista ergada'—oo ka koobnaa saddex oday dhaqan ama ka badan kursigiiba iyo ugu yaraan labo xubnood oo kale oo metelayay bulshada rayidka ah—ayaa loo xilsaaray inay soo magacaabaan 101 ergo. Qaabkan cusub waxa uu ballaariyey tirada oday dhaqameedyada qeybta ka ahaa geeddi-socodka doorashada oo markii hore ahaa 135 lagana dhigay in ka badan 700, iyadoo ay jireen odayaal aad u yar oo horey ugu jiray liiskii 2016 oo qeyb ka ahaa doorashadii 2021/22. Waxaa intaa dheer, waxaa jiray sheegashooyin badan oo ah in 'odayaasha' la magacaabay ay qabiilladooda ku dhex lahaayeen awood xaddidan, haddiiba ay jirtay. Sida uu nabaddoon caan ah oo daraasaddan lagu wareystay uu sheegay, kuraastu inta badan 'magac ahaan' ayay iska leeyihiin beelaha, balse musharraxiinta kasoo jeeda beelaha waxaa kala watay madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada si ay danahooda siyaasadeed u metelaan. Intaa waxa dheer, sharciyaddii odayaashii dhaqabka waxaa meesha ka saaray doorkii ay ku lahaayeen hawsha doorashada.

# Saameynta 4.5 ee dimuqraadiyeynta iyo dowladnimada

Ku-dhaqanka joogtada ah ee nidaamka 4.5 waxa uu saameyn badan ku yeeshay dimuqraadiyadda iyo dowlad wanaagga Soomaaliya. In saameyntan la fahmo ayaa muhiim ah si loo tixgeliyo xulashooyinka mustaqbalka.

- **Doorka qabiilka ku leeyahay siyaasadda iyo metelaadda Soomaalida ma aha mid go'an wakhtiyo kala duwanna wuu is bedbedelay.** Marka, ma jiro xiriir aasaasi ah oo ka dhexeeya qabiilka iyo siyaasadda. Inkastoo tani ay abuureyso fursado ay madaxdu ku nidaamin karaan aqoonsiga qabiilka, waxay sidoo kale soo abuuri kartaa fursad ay Soomaalidu dib ugu milicsato doorka qabiilka uu siyaasadda ku leeyahay.

- **Iyadoo la hubinayo heerka aasaasiga ah ee metelaada kooxo badan, 4.5 waxaa lala xiriiriyaa in uu qeyb ka qaatay soo noqoshada xasiloonida kadib dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya ka dhacay 1990-meeyadii.** Nidaamka 4.5 ayaa u muuqa mid muhiim u ahaa yegleelidda hay'ado dowladeed. Wixii markaas ka dambeeyay, iskahorimaadyadii rabshadaha watay ee u dhexeeyay beelaha ayaa ka hoos maray heerkii ay ahaayeen sanadihii ay socdeen dagaalladii sokeeye.

- **Muddo kadib, isticmaalka joogtada ah ee habka 4.5 ayaa noqday mid lala xiriiriyo siyaasadda kor ka timaada oo ay saameynta weyn ku leeyihiin indheergarad kooban.** Awood-qeybsiga beelaha ku saleysan ayaa soo koobay saaxadda siyaasadda, taasoo keentay in koox yar oo masuuliyiin iyo oday dhaqameedyo ah ay la wareegaan saaxadda siyaasadda. Arrintan ayaa si gaar ah loo wajahaa marka ay dhacayaan doorashooyinka dadban ee ku saleysan nidaamka 4.5, kuwaasoo lagu sameeyo faragelin siyaasadeed iyo musuq-maasuq. Inkastoo aanay ahayn qodobka keliya, haddana arrinkan waxa uu ka qeyb qaatay xuquuq la'aan ballaaran oo ay muwaadiniintu kala kulmeen siyaasadda.

- **Nidaamka 4.5 waxa uu caqabad weyn oo hortaagan ku yahay horumarinta ka qeybgalka haweenka iyo dhallinyarada ee siyaasadda.** Inkastoo takoorka haweenka iyo dhallinyarada ee siyaasadda Soomaaliya ay sababeen arrimo badan, haddana sii socoshada nidaamka metelaadda qabiilka waxa uu xoojinayaa hab-dhaqannada bulsho iyo siyaasadeed oo ay faa'idada ku qabaan ragga iyo siyaasiyiinta da'da weyn.

- **Nidaamka 4.5 waxaa uu sidoo kale qeyb ka qaatay takooridda iyo ka saaridda saaxadda siyaasadda ee kooxo gaar ah.** Tani waxa ay ka muuqataa, tusaale ahaan, marka la eego isbeddellada kooxaha ugu badan ee qabtay xafiiska ugu sarreeya ee dalka. Waxaa intaa dheer, nidaamka gorgortanka ee qoondeynta kuraasta ayaa si sii kordheysa ugu nugul inay kooxaha awoodda badan maamushaan taasoo dhibaato ku yeelaneysa kooxaha awoodda yar. Waxaa muhiim ah in la ogaado in duudsiinta ay jirtay kahor inta aanu awood-qeybsiga qabiilka ku saleysan noqon udub-dhexaadka siyaasadda Soomaaliya.

- **Sidoo kale, waxaa la sheegay in nidaamka 4.5 uu kooxo gaar ah ka ilaaliyay in ay kuraasta kala wareegaan kooxo kale.** Qaar kamid ah kooxaha taariikh ahaan lagu faquuqay bulshada Soomaalida dhexdeeda ayaa muujiyey in nidaamka 4.5 uu yahay mid u xaqiijiyey in ay helaan metelaad. Tani waxay abuureysaa xaalad is burinayso, oo ay kooxo kala duwan oo xaqooda la duudsiiyo ku qabaan isla nidaamkan oo ah mid marna metelaaddooda ilaalinaya marna duudsiinaya metelaad siyaasadeed (sida qabashada xilka madaxweynaha).

- **Awood-qeybsiga qabiilka ku saleysan ayaa meesha ka saaray saameyntii wanaagsaneyd ee odayaasha beelaha.** Markii ay odayaashu aad ugu milmeen siyaasadda, doorkoodu wuxuu noqday mid aan aad uga duwaneyn siyaasiyiinta iyo madaxda kale. Sidaas oo kale, sharciyadda odayaasha dhaqanka ee kaalinta ay ku leeyihiin doorashooyinka iyo geeddi-socodyada siyaasadeed ayaa sii lumayay, taasoo ka dhigtay nidaamyadaas kuwo u nugul faragelin siyaasadeed.

- **Sii adeegsiga nidaamka 4.5 waxa uu caqabado waaweyn ku yeelanayaa in doorasho qof iyo cod ah ay ka dhacdo Soomaaliya.** In kuraas loo qoondeeyo qabiilo gaar ah waxay ka hor imanaysaa mabaadi'da aasaasiga ah ee doorasho qof iyo cod ah. Inkastoo ay suuragal tahay in la isku lifaaqo habka awood-qeybsiga beelaha ku saleysan iyo doorasho toos ah, tani waxay u baahan doontaa habab isku-dhaf ah oo hirgelintooda ay adkaan karto ama qaali noqon karto. Xitaa haddii la sameeyo doorasho

noocaas ah, waxaa laga yaabaa in weli loo arko in ay xaddidayso baaxadda dimuqraadiyeynta.

- **Awood-qeybsiga beelaha ayaa saameyn weyn ku yeeshay helitaanka hay'ado dowladeed oo wax-ku-ool ah**. Inta badan magacaabista siyaasadda iyo shaqaaleysiinta shaqaalaha dowladda waxaa lagu saleeyaa nidaamka 4.5 ama nidaamyo la xiriira halkii karti iyo aqoon lagu saleyn ahaa, taasoo adkeyneysa in la dhiso maamul dowladeed oo tayo leh iyo in la kordhiyo shaqaaleysiinta kartida iyo aqoonta ku saleysan. Hab-dhaqannadani waxa ay sidoo kale ka dhigan yihiin in madaxda dowladdu ay yihiin kuwo qabiilku ay la xisaabtamaan halkii ay la xisaabtami lahaayeen muwaadiniinta. Tani waxay caqabad weyn ku tahay dhisidda dowladnimo tayo ah oo la isla xisaabtamo.
- **Nidaamka 4.5 ma ahan midka keliya ee go'aamiya metelaadda iyo metelaad la'aanta.** Qabashada kursi baarlamaan ama xafiis kale iyadoo la isticmaalayo habka 4.5 waa in aanan mar kasta lala mid dhigin metelaad dhab ah. Nidaamku waxa inta badan xoojinayaa aragtida ah in hoggaanka hay'adaha ay siman yihiin ayna waafaqsan yihiin 4.5, balse awoodda ayaa weli si aan rasmi ahayn ugu aruursan kooxo gaar ah. Sidoo kale, waxaa marar badan dhacda in shakhsiyaad iyo kooxo ku dulman nidaamka 4.5 ay awood baaxad leh helaan.

# Talooyin tixgelin mudan

Si loo taageerayo habab siyaasadeed oo loo dhan yahay oo lagu gaaro heshiis la isku raacsan yahay, saddex xulasho oo lagu xallin karo nidaamka 4.5 ayaa halkan lagusoo bandhigay. Iyadoo aan loo eegeynin xulashada la qaadan doono, waxaa muhiim ah in xalka uu kasoo boxo wada-tashi qaran, oo ay sidoo kale dadweynaha ka qeyb galayaan xalka isbeddelka, si ay awood ugu yeeshaan ka-qeybgalkooda iyo taageeradooda ee geeddi-socodka:

1. **Laalidda 4.5**: Xulashadan, hoggaamiyeyaasha siyaasadda waxay ballan qaadayaan inay si buuxda uga guurayaan nidaamka 4.5 doorashada federaalka ee soo socota, waxayna billaabayaan u diyaargarowga hirgelinta nidaamka xisbiyada badan. Siyaasiyiinta waxay dib-u-eegis ku sameynayaan hindise-sharciyeedka doorashada, heshiis ayayna ka gaarayaan arrimaha weli la isku hayo, waxa ayna meesha ka saarayaan qodobbada awood-qeybsiga beelaha ee ku jira xeerka doorashada. Haddii caqabado muuqda ay doorasho toos ah ka dhigaan mid aan suuragal ahayn, waxaa laga yaabaa inay weli suuragal tahay in la naqshadeeyo nidaam cusub oo doorasho dadban oo aan ku saleysneyn nidaamka 4.5, iyadoo metelaadda lagu saleyn karo gobollo ama degmooyin. Tixgelin dheeraad ah ayaa loo baahan doonaa in la siiyo saameynta go'aankan uu ku yeelanayo heerka baarlamaannada dowlad-goboleedyada, iyo sida uu doorashooyinka dowlad-goboleedyada u saameyn doono. Magacaabista siyaasadeed ee golaha wasiirada iyo xafiisyada kale waxaa sida ugu dhaqsiyaha badan loo sameyn doonaa iyadoo aan la tixgalineynin heyb qabiil, halka dhammaan magacaabista shaqaalaha dowladda ay noqon doonaan kuwo lagu saleeyey karti iyo aqoon.

*Qiimeyn*: Ka gudbidda 4.5 si degdeg ah waxa ay abuuri kartaa fursad lagu xalliyo saameynta taban ee nidaamka 4.5, waxa ayna u furi kartaa dariiqooyin ka qeybgal siyaasadeed oo ballaaran haweenka iyo kooxaha la heyb sooco, waxa ayna horumarin kartaa awoodda iyo waxtarka dowladda. Dhinaca kale, ka guurid degdegga ah ee 4.5 waxa ay keeni kartaa xasillooni-darro, waxayna u badan tahay in ay sababto isku-dhac maadaama uu isbeddel ku imaanayo isu-dheellitirka awoodaha. Waxaa intaa dheer, haddii aan wax laga qaban arrimaha kale ee bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale, waxaa jirta khatar ah in kooxaha awoodda badan ay kordhin doonaan awoodda ay ku dhex leeyihiin nidaamka siyaasadda.

2. **Isku-dhafka 4.5**: Xulashadan, Soomaaliya waxa ay joogtayneysaa qeybo kamid ah habka awood-qeybsiga beelaha taasoo qeyb ka noqoneysa nidaamka dimoqraadiyadda. Habab badan ayaa la isticmaali karaa. Tusaale ahaan, iyadoo laga yaabo in doorashada baarlamaanka aan lagu saleynin nidaamka 4.5, doorashada hoggaanka qaranka iyo/ama golaha wasiirrada ayaa loo isticmaali karaa nidaamka awood qeybsiga. Noocyada doorashada waxay isku dari karaan qeybo kamid ah nidaamka 4.5 iyo doorasho qof iyo cod ah. Tan waxaa kamid noqon kara qaab doorasho oo ku saleysan metelaadda isku-dheellitiran oo liisaska xisbiyada la waafajiyo nidaamka awood qeybsiga beelaha. Sharciga doorashada ee hadda jira wuxuu sidoo kale soo bandhigayaa hab lagu mideynayo nooca doorasho ee 'horreeyaa guuleysta' iyo nidaamka 4.5. Hab kale ayaa noqon kara in metelaadda Golaha Shacabka lagu saleeyo nidaamka xisbiyada badan, halka metelaadda Aqalka sare lagu saleynayo qabiilka.

   *Qiimeyn*: Dhammaan hababkan waxay leeyihiin caqabado, balse haddii mid kamid ah lagu heshiiyo, waxay horseedi lahayd waddo loo maro dimoqraadiyad ballaaran iyadoo la yareynayo khatarta isku dhacyada muddada dhaw dhalan kara. Dhinaca kale, waxaa laga yaabaa in hababkan ay ku filnaan waayaan inay joojiyaan heyb sooca, eexda iyo ku tiirsanaanta indheergaradka oo lala xiriiriyo siyaasadda Soomaaliya, waxaana ka dhalan kara colaado mustaqbalka.

3. **Si kumeelgaar ahaan u isticmaalka 4.5**: Xulashadaan, hoggaamiyeyaasha siyaasadda waxay ballan qaadayaan in ay mustaqbalka fog si buuxda uga tanaasulayaan nidaamka 4.5, laakiin ay isticmaalayaan habab kale oo muddeysan, iyagoo isticmaalaya habab kamid ah hababka isku-dhafka ah wakhti cayiman. Tan waxa ay noqon kartaa in si kumeelgaar ah dib-u-habeyn loogu sameeynayo nidaamka 4.5 si loo maareeyo qaar kamid ah saameyntiisa taban, iyadoo islamarkaana la qorsheynayo dib-u-habeyn ballaaran. Horumarka noocan oo kale ah waxaa ka mid noqon kara in doodo laga sameeyo takooridda heerarka kala duwan ee kooxaha qaar, iyadoo si habboon loo hagaajinayo hannaanka doorashada. Hab kale ayaa noqon karaa in lagu noqdo fikradda 'beesha 6-aad', oo ah in haweenka loola dhaqmo si ka madax-bannaan beelaha ama in la sahmiyo habab cusub oo qoondada haweenka ee boqolkiiba 30 dib loogu dabaqayo qeyb kasta oo nidaamka 4.5 kamid ah. Isku shaandheyn iyo in loo dhan yahay xilalka sare ee hoggaanka qaranka waxay sidoo kale noqon kartaa hab lagu kordhiyo ka qeybgalka siyaasadda. In lagusoo koobo nidaamka 4.5 ee awood-qeybsiga beelaha Golaha Shacabka ayaa sidoo kale abuuri karta fursad ah in shaqaalaha rayidka ee dowladda lagu shaqaaleysiiyo aqoontooda iyo kartidooda.

   *Qiimeyn*: Xulashadan waxa ay u badan tahay in ay yareyso khataraha khilaafyada ee muddada dhaw ka dhalan kara kalsoonida yar, maadaama isbeddelku uu noqon doono mid tartiib ah. Dhinaca kale, xulashadan waxay abuureysaa in qeybo badan oo ka mid ah cilladaha nidaamka 4.5 ay sii jiraan muddo dheer.

## Xuquuq

Faalladan Kooban waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan. Somali Public Agenda waxa ay wadashaqeyn la leedahay Somali Dialogue Platform.

Machadka Rift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2023.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-Non-Commercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).